

MINNEAPOLIS

Magaaladaada Codkaaga.

BISHA NOOFEMBAR 5-TEEDA



Doorashada soo socoto ee xilliga dayrta cod-bixiyaasha magaalada minneapolis waxa ay isticmaali doonaan oo ay codkooda ku dhiiban doonaan nidaam loo yaqaan **ranked-choice voting** oo ah **hab cod-bixiyaashu darajo ku kala siin musharraxiinta** marka ay codaynayaan oo ay doorayaan duqa magaalada, gudiga magaalada, gudiga qaabsan canshuurta, iyo gudiga maamulka dhulka iyo ciyaaraha. Nidaamkani waa mid fursad ku siin in aad xafiis kasto u dooratid 3 tartamayaal adigoo codkaaga musharraxiintaas ku kala siin darajooyin.

Maalinta doorashada magaalada minneapolis: **bisha noofembar 5, 2013**

Waa maxay ranked-choice voting?

Ranked-choice voting waa hab fursad ku siin in aad sedex musharraxiin u dooratid xafiis kasto oo magaalada ka tirsan oo loo tartami adigoo darajo kala siin tartamayaasha. Madaama magaalada minneapolis ay isticmaali doonto nidaamka codaynta ee darajo kala siinta musharraxiinta (ranked-choice voting), ma jirto doorashada khaaska u ah ururada (primary). Bisha noofembar 5-teeda, 2013, doorashada khaaska u ah ururada iyo doorashada guud ayaa la isku dari doonaa oo laga dhigi doonaa hal doorasho.

Sideen baa u codayn doonaa?

Waxaad u codayn doontaa sida caadiga ah ee doorashooyinka kale, codkaaga waxaad ku dhiban kartaa waraqaaha cod-bixinta adigoo calaamadeyn oo buuxin waraqaahaas cod-bixinta. Laakin sanadkan 2013, halkii tartan kastaba aad u dooran lahayd hal musharrax, waxaad fursad u leedahay in aad tartan kasto u dooratid 3 musharraxiin adigoo kala siin darajooyin.

Warqad kasto oo codka lagu bixiyo waxa ay leedahay seddex saf (columns). Marka aad dooran xafiis kasto, warqadaada cod-bixinta ka bilaab dhinaca bidix oo u calaamadey dhinaca midig oo doorashadaada kowaad ku qor safka kowaada. Haddii aad dooni u-codayn darajo labaad iyo darajo sedexaad, waxaad ku calaamadeysaa safka labaad iyo safka sedexaad. Halkii jagaba, saf keliya u calaamadey qofka musharraxa ah.

Haddii aad khalad samaysid marka aad calaamadeyn warqada cod-bixinta, gar-sooraha doorashooyinka ka codso warqad cod-bixin oo cusub.

Sidee baa loo tiriyaa codadka?

Habeenka doorashada, musharrax kasto waxaa loo tirin doonaa codadka kaalinta darajada 1aad ee u heelo. Haddii musharrax u heelay codad ku filan, musharraxaas ayaa ku gulaystay doorashadaas. Tusaale ahaan, tartanka duqa ee magaalada, musharraxu waa in u heelaa codad tiradood ay ka badan yihiin boqolkiiba konton si uu ugu gulaysto ama ay ugu gulaysato doorashadaas.

Haddii qofna usan heelin codad ku filan, waxaa la bilaabi habka tirinta ee codadka darajooyinka taas oo lagu kala reebi doono tartamayaasha siday ugu kala codad badan yihiin, islamarkaana waxaa la tirin doonaa codadka darajooyinka labaad iyo codadka darajooyinka sedexaad. Tirinta codadka ayaa socon doono ilaa hal musharrax u heelo codad ku filan oo doorashadaas ku gulaysto ama ay ku gulaysato.

Nidaamka aad darajada ku kala siin ee warqada cod-bixinta waa sida hoos ku qoran:

Doorashadaada kowaad safkan ku calaamadey



Doorashadaada labaad ku calaamadey safkan



Doorashadaada sedexaad ku calaamadey



MAYOR			
Rank your first, second and third choice candidates in the columns below. One to be elected.			
1	2	3	
1st Choice	2nd Choice, if any Must be DIFFERENT from your 1st choice	3rd Choice, if any Must be DIFFERENT from your 1st and 2nd choices	
Select One	Select One	Select One	
<input type="radio"/> THEODORE WIRTH PARK <small>Parks Party</small>	<input type="radio"/> THEODORE WIRTH PARK <small>Parks Party</small>	<input type="radio"/> THEODORE WIRTH PARK <small>Parks Party</small>	
<input type="radio"/> MINNEHAHA PARK & FALLS <small>Parks United</small>	<input type="radio"/> MINNEHAHA PARK & FALLS <small>Parks United</small>	<input type="radio"/> MINNEHAHA PARK & FALLS <small>Parks United</small>	
<input type="radio"/> NORTH MISSISSIPPI PARK <small>Parks Party</small>	<input type="radio"/> NORTH MISSISSIPPI PARK <small>Parks Party</small>	<input type="radio"/> NORTH MISSISSIPPI PARK <small>Parks Party</small>	
<input type="radio"/> CHAIN OF LAKES <small>Parks United</small>	<input type="radio"/> CHAIN OF LAKES <small>Parks United</small>	<input type="radio"/> CHAIN OF LAKES <small>Parks United</small>	
<input type="radio"/> DOWNTOWN RIVERFRONT <small>Parks Party</small>	<input type="radio"/> DOWNTOWN RIVERFRONT <small>Parks Party</small>	<input type="radio"/> DOWNTOWN RIVERFRONT <small>Parks Party</small>	
<input type="radio"/> _____ <small>Write-in, if any</small>	<input type="radio"/> _____ <small>Write-in, if any</small>	<input type="radio"/> _____ <small>Write-in, if any</small>	



Wixii warbixin dheeraad ah, boqo vote.minneapolismn.gov.